

Waxyaabaha laga filayo Hay'adaha Dhaqangelinta Sharciga Marka La sameynayo Warbixin

HELITAANKA

- Sarkaalku waa in uu codsadaa baahiyaha turjumaada luqadeed. Sarkaalku waa in uu adeegyada turjumaada ka dhigaa mid aysan wax lacag ahi kaaga baxayn adiga. Hay'adaha dhaqangelinta sharciga waa in aysan qoyskaaga ama ilme u adeegsan in ay wax turjumaan.
 - Sarkaalku waa in uu codsadaa wixii baahiyo kale oo helitaan ah ee ay dhici karto in aad qabto.
-

XUQUUQDA DHIBBANAHA

- Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si sharaf iyo ixtiraam leh.
 - Waxaad xaq u leedahay in aad door muhiim ah ku yeelato nidaamka caddaalada dembiyadda.
 - Waxaad xaq u leedahay in aad yeelato turjubaan lacag la'aan ah si aad u gudato xuquuqda dastuuriga ah ee dhibbanuhu leeyahay inta lagu jiro nidaamka caddaalada dembiyadda, oo ay ku jirto kaliya daawashada dhageysi maxkamaddeed.
 - Waxaad xaq u leedahay in aad yeelato qof wax taageera oo kula jooga dhageysi kasta ama kulanka aad leedahay inta lagu jiro nidaamka caddaalada dembiyadda (marka laga reebo Xeerbeegtida Guud iyo Qiimeynta Ku Xadgudubka Ilmaha). Qofku markhaati kama noqon karo dhacdada ama dembiga la baarayo, waana in uu noqdaa ugu yaraan 18 jir ama ka weyn. Waxay noqon kartaa saaxiib, xubin ka tirsan qoyska, hoggaamiyaha bulshada, qof kale oo wax taageera.
-

DIIWAANNADA

Sarkaalku

- waa in uu sugaa oo ilaaliyaa caddeynta halka dembigu ka dhacay, oo uu ku jiro internet-ku.
- waa in uu sahamiyaa fursadaha meel ammaan ah oo aad wax ku soo sheegto (tusaale, goob aad dooratay oo ah mid gaar ah, sugan, oo ka fog dembiilaha).
- waa inuu soo ururiyaa/sawirraa wixii caddeyn ah ee wax taageeraysa sida qoraalada, sawirrada, sawirrada 'graffiti' iyo shay la isticmaalay oo astaan ah. Tusaale ahaan, sarkaalku waxaa dhici karta in uu rabo dokumenti ama sawirro rinjiga buufinta midabka ee loo isticmaalay in lagu rinjiyeeyo astaanta nacaybka ee dhismaha, maadaama ay dhici karto in uu macno yeesho baaritaanka dambe.
- waa in uu wareystaa oo diiwaanka geliyaa wada hadalada lala leeyahay markhaatiyaasha, oo ay ku jiraan dadka aanan halkaasi joogin waqtigii dembigu dhacay, balse ay dhici karto in ay hayaan macluumaad ama caddeyn ku saabsan dembiga.
- waa in uu wax ka weydiiyaa xanuunka ama dhaawaca aad dareentay. Inta badan wuxuu isticmaali doonaa qiyaasta heerka xanuunka si uu weydiiyo tani. Xusuusnow, dacwad isku soo oogista inta badan waxay ku xiran tahay heerka dhaawaca, markaa "ha is adkayn."
- waa in uu wax ka weydiiyaa qasaarahaaga dhaqaale. Xusuusnow in aad qiime u qoondeyso wax kasta, xataa haddii qasaaruhu uu ahaa dhaxal qoys. Aan qiime lahayn waxay ka dhigan tahay \$0 dunida sharciga ah, markaa qiime dulsaar.
- waa in uu wax ka weydiiyaa ujeedada ka dambeysa eexda. Waxa ay tahay cayda aad maqashay? Waxa kaa dhigaya in aad aaminto in dembiilaha ay dhiirigelisay eex ka dhanka ah dabaqadaada la dhowrayo ee dhabta ah ama loo arko?
- waa in uu ku siiyaa macluumaadkiisa laga soo xiriirayo oo uu weheliyo lambarka warbixinta. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa sarkaalka lambarka aqoonsigiisa 'badge'.

- Waxaad sidoo kale hay'adaha dhaqangelinta sharciga ka codsan kartaa in ay qoraan warbixinta booliska si ay u qoraan dhacdada dembiga, xataa haddii uusan dhicin dembigu. Hay'adaha dhaqangelinta sharciga waxaa dhici karta in ay diidaan codsigani, balse waad weydiin kartaa had iyo jeer.
-

GUDBINTA IYO LA SII SOCOSHADA

- Sharciga Oregon ayaa faraya hay'adaha dhaqangelinta sharciga in ay dhibbanayaasha dhacdooyinka eexda u gudbiyaan adeegyada dhibbanaha ee degaanka oo loo qalmo ama [Khadka Ka Jawaabida Eexda](#) ee gobolka Oregon.
 - Saraakiishu waa in ay soo sheegaan waxa la filayo ee xiga iyo cidda aad la xiriiri karto si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah. Miyay ku soo wici doonaan wixii la xiriira sii dabagalka? Ma u baahan tahay in aad wacdo xafiiska xeer ilaaliyaha? Ma qof baa la xidhay? Ma jiraa amarka ah in aan la isla soo xiriirin? Ma jirtaa caddeyn ku filan oo qof loogu xidhi karo dembi?
 - Saraakiishu macluumaadkaada lama wadaagi karaan ICE, haddii aysan ku qasbaynin amar uu saxiixay qareen.
-